## SUURAT Ar-RAXMAAN:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud
iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *(Eebaha) Raxmaan ah.*
2. *Wuxuu baray (Nabiga iyo dadka kalaba) Quraanka.*
3. *Dadkana wuu abuuray.*
4. *Wuxuuna baray dadka (Hadalka).*
5. *Qorraxda iyo dayaxuna waxay ku socdaan xisaab.*
6. *Xiddigga iyo Geedkuba way Sujuudaan (Eebe Dartiis).*
7. *Samadana Eebaa koryeelay, Garsoorna wuu dajiyay.*
8. *Si aydaan uga gudbin Caddaaladda.*
9. *Miisaanka ku hagaajiya Caddaalad, hana nusqaamininna.*
10. *Dhulkana Eebe wuxuu u dajiyay khalqiga.*
11. *Dhexdiisa waxaa ah Faakihad (khudaar) iyo Timir Fiido leh.*
12. *Xubuubna (midho) ball leh iyo udgoona wuu abuuray.*
13. *Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan (Insi iyo Jinniyow).*
14. *Dadka Eebaa ka abuuray dhoobo Jilay oo kale ah.*
15. *Jaankana wuxuu ka abuuray ololka Naarta.*
16. *Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Eebe wuxuu ku billaabay Magaciisa Raxmaan ah, iyo Nicmooyin badan ugu nicmeeyay khalqigiisa, sida Quraanka uu baray addoomadiisa, abuuridda,

hadalka, Qorraxda, Dayaxa, Xiddigaha, Geedaha, Cirka, Dhulka iyo Caddaaladda uu soo dajiyay, saas daraadeed yuu ku soo celceliyay Suuraddan u digidda beeninta Nicmooyinkiisa. Jaabir waxaa laga wariyay (Eebe ha ka raalli noqdee) inuu yidhi: 'Waxaa u soo baxay Rasuulkii Eebe (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) asaxaabtiisii, wuxuuna ku akhriyay Suuratu-Raxmaan bilawgeeda ilaa dhammaadkeeda, markaasay aamuseen wuxuuna yidhi: (Waxaan ku akhriyay Suuraddan Jinniga Habeenkii Jinniga, iyagaana idinka fiicnaa raddinta (Jawaab), markastoon imaaddo hadalka Eebe Sarreeye: (Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaa) waxay dhahaan: 'mid Nicmadaada ka mid ahna Eebahannow beeninmayno Adaana mahad iska leh.' waxaa wariyay Tirmidi.

***17. Ilaaheen waa Eebaha Labada Qorrax ka soo bax iyo Labada Qorrax u dhac.***

***18. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***19. Eebe waan kan Labada Badood dariseeyey iyagoo kulmi.***

***20. Dhexdoodana yeelay soohdin (kala reebta) iskumana xadgudbaan.***

***21. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***22. Waxaa lagala baxaa Baddaas Lu'Lu' iyo Murjaan (Jawhar).***

***23. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***24. Eebe waxaa u sugnaaday Doomaha socda Badda oo Buuro la mid ah.***

***25. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***26. Dhammaan waxa (Dhulka) korkiisa ah wuu tagi.***

***27. Waxaase hadhi Eebaha wayn ee sharafta leh.***

***28. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

Qorraxdu halkay ka soo muuqato, ama ku qarsoonto, badaha aan isku khaldamaynin jowhara lagala soo baxo, doomuhuna dhex sabbeeyaan iyo khaliqiga intiisa kalaba Eebaa iska leh, isagaana maamula, wax kasta oo dhulka ku dul noolna wuu tagi oo dhiman, wax Eebe ka soo hadhay oo joogi ama baaqi ahaanna ma jiro, saa darteed, waa in la hormarsadaa camal wax tara maalinta aan naf kale wax taraynin in Eebe doono mooyeen.

***29. Waxaa Eebe wax waydiista Samada iyo Dhulka waxa ku sugan, goorwalbana wuxuu maamuli arrin.***

***30. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***31. Waana idin xisaabin si dhab ah Insi iyo Jinniyow.***

***32. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***33. Jinni iyo Insiyow haddaad kartaan inaad ka baxdaan Samada Jahooyinkooda iyo Dhulka ka baxa, kamana bixikartaan xujo la'aan.***

***34. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***35. Eebe (hadduu doono) wuxuu idinku diri Olol Naar ah, iyo Maar (la dhalaaliyay) umana gargaarsanaysaan.***

***36. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan***

***37. Markay Samadu dillaacdo oy noqoto ubax guduudan oo subag la mid ah (dhalaasho) markaas dadkaa la abaalmarin.***

***38. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***39. Maalintaas Ruux la warsan dambigiisa Insi iyo Jinniba ma jiro.***

***40. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***

Cid walba way u baahan tahay Ilaaheed, cir iyo dhul iyo meel kastaba ha joogtee, Eebana isagaa goor walba maamula khalqigiisa, isagaana xisaabin Qiyaamada,

wax awood ah ama xoog ah oo ilaahay lagaga hortagaana ma jiro, iyo wax ka carari kara midna, xumaanlowgana wuxuu ku abaal marin xumaan, wax gargaara ahna ma helo maalinta xisaabta iyo Qiyaamaha, Eebana wax kama qarsoona cidna wax ma warsado Maalinta abaal marinta.

***41. Dambiilayaasha waxaa lagu aqoonsan astaamahooda, waxaana la qaban Foodda iyo gommadaha (Naartaana lagu tuuri).***

***42. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***43. Taani waa Jahannamadii ay beeniyeen Dambiilayaashu (yaa lagu dhihi ).***

***44. Waxay ku meereysan Jahannamo iyo biyo kulayl daran dhexdooda.***

***45. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***46. Ruuxii ka yaaba Eebe hor istaaggiisa wuxuu mudan Laba Janno.***

***47. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***48. Jannooyinkaas oo midabyo leh (iyo Laamo).***

***49. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***50. Waxaa laga helaa ilo socda .***

***51. Nimooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***52. Waxaa laga helaa nooc kasta oo Faakiha ah (Khudaar ah).***

***53. Nimcooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***Sharaxda Suurrada ( 4 )***
Sama falaha iyo xumaan faluhu iskuma qasna Eebe agtiisa, waxaana dambiilaha lagu aqoonsan calaamooyinkiisa, ciqaab iyo Naarta Jahannamo oo lagu tuurana wuu la kulmi, taasoo u dhex meereysan, lamana dulmiyin ee isagaa xaqa beeniyay, ruuxiise ka yaaba Eebe la kulankiisa iyo xisaabtiisa waxaa lagu abaal marin Janno wanaag ku dhan yahay, nicmooyinka Eebe waa in lagu mahadnaqo khayrkana

loogu kaalmaysto.

***54. Waxay ku dangiigsan (ehlu-Jannuhu) Gogol ay tahay hoosteedo istabraq (xariir) Midhaha Jannooyinku waa u dhawyihiin.***

***55. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***56. Jannooyinka iyo Firaashka waxaa ku sugan Haween Indha waawayn oo dhawrsoon oosan taabanin horay Insi iyo Jinni midna.***

***57. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***58. Waxaad moodaa Haweenkaas Yaaquut iyo Murjaan (Jawhar midab leh).***

***59. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***60. Wanaag abaalkiisu soo wanaag ma aha.***

***61. Nicmooyina Eebe teebaad beeninaysaan.***

***Sharaxda Suurrada ( 5 )***

Adduunku waa guri shaqo, Aakhirana waa guriga abaal marinta, suuraddaanna wax badan yuu Ilaaheen kaga warramay jannada iyo tilmaameheeda, iyo wanaaggeeda, iyo in ehlu Jannuhu ku noolaan khayr iyo nicmo, iyo wax kasta oo wanaag ah, Eebaana ku abaal mariyay nicmadaas, maxaa yeelay wanaag abaalkiisu waa wanaag. Anaa Binu Maalik waxaa laga wariyay: ‘Rasuulka Eebe yaa akhriyay (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee): “Wanaag Abaalkiisu soo wanaag ma aha”, wuxuuna yidhi: “ Ma ogtihiin wuxuu Eebihiin yidhi ?” waxay dheheen: ‘Eebe iyo Rasuulkiisaa og’, wuxuu yidhi: “wuxuu leeyahay ruuxaan ugu nicmeeyay Eebe aqoonsi abaalkiisu waa janno.” waxaa sheegay Bagawi.

***62. Waxay heli Labadaa janno ka sokow kuwa kale.***

***63. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.***

***64. Waana Laba Janno madow (Cagaaran).***

*65. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*66. Waxaa dhexdeeda ah Laba ilood oo burqan.*

*67. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*68. Dhexdooda waxaa ah Faakihad (khudrad) iyo Timir iyo Rummaan.*

*69. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*70. Dhexdooda waxaa ah Haween khayr leh oo Quruxsan.*

*71. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*72. Waa Haween Indhacad oo Gurigooda jooga.*

*73. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*74. Waa Haween uusan horay u taabanin Insi iyo Jinni midna.*

*75. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*76. Waxayna ehlu-Jannuhu ku dangiigsan Barkimo cagaaran iyo Gogol Quruxsan.*

*77. Nicmooyinka Eebe teebaad beeninaysaan.*

*78. Waxaa barakadiisu badnaatay Magaca Eebaha wayn ee sharafta leh.*

***Sharaxda Suurrada ( 6 )***

Saasoo kale waxay Aayadahani ka qisoon Jannada iyo ehelkeeda iyo waxa wanaag ah ee Eebe ku dhammeeyay, waxayna Suuraddu ku soo uruursatay markay wax badan soo celcelisay Nicmada Ilaahay iyo inaan la beeninin waynida Ilaaheen iyo sharaftiisa, waxaana waajib ah in si dhab ah loo qaddariyo loona caabudo, maxaa yeelay waa Ilaaha adduunka iyo aakhiraba, ee mu’miniinta u naxariista, dambiilayaashana ka aarsada. Waxaa la waydiiyay Xasanul-Basri hadlka Eebe Sarreeye (Gogol quruxsan) wuxuuna yidhi: ‘waa Gogosha ehlu Jannaha ee Aabihiin waayee doona.’